



(Dib loo eegay Abriil 2025)

Xaashida Xaqiiqada ee Jadeecada

Siday u faafto

Jadeecadu waxay si sahlan oo degdeg ah ugu faaftaa hawada marka qof buka uu neefsado, qufaco, hindhiso ama hadlo. Jadeecadu waxay ku sii jiri kartaa hawada muddo ilaa 2 saacadood.

Astaamaha

Calaamaduhu waxay badanaa biloowdaan 7 ilaa 21 maalmood kadib (badanaa qiyaastii 10 maalmood) kaddib markay ag joogeen qof kale oo buka. Waxaa ka mid ah:

- Qandho
- Duuf
- Qufac
- Dareemidda daal ama xanaaq
- Indho casaan ah oo qoyan
- Dhibco yaryar oo caddaan ah oo ku samaysma afka iyo cunaha

Marka dambe, finankii ka soo biloowday madaxa/wejiga ayaa ku faafa jirka oo dhan (midabku wuu kala duwan yahay iyadoo ku xiran midabka maqaarka). Finanku waxay sii jiraan 5-6 maalmood.

Dhibaatooyinka suurtoogalka ah

Jadeecadu way ka sii dari kartaa waxayna keeni kartaa dhibaatooyinka sida caabuqa dhegta, caabuqa sambabada ama caabuqa maskaxda.

Joojinta faafitaanka jadeecada

- Jadeecada waxaa lagaga hortagi karaa tallaalka MMR (jadeecada, qamoow-qashiirka, Rubeellada). Aad bay muhiim ugu tahay dhammaan dadka uqalma in la tallaalo.
- Inta aad isbitaalka ku jirto, haddii aad ka shakisan tahay jadeeco ama la caddeeyey jadeecada, waxaa lagu geyn doonaa qol gaar ah shaqaalaha ku daryeelayana waxay xiran doonaan goon, galoofisyo, maaskaro iyo muraayado.
- Waa inaad qolkaaga ku jirtaa si aadan jadeecada ugu faafin dadka kale.
- Haddii daryeelka laguugu siinayo meel ka baxsan qolkaaga, waxaa lagaa codsan doonaa inaad xirato maaskaro.

Maxaa la sameeyaa haddii ay kugu dhacdo jadeeco

- Haddii aad dhalatay kahor 1970-kii, oo jadeeco hore kuugu dhacday, ama aad qaadatay laba tallaalka oo jadeeco ah, waxa ay u badan tahay in aad difaac ka haysato jadeecada.
- Haddi aanad difaac ka haysan oo aad ka ag dhawayd qof jadeeco qaba isla markiiba wac dhakhtarkaaga, ama [gaybta caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga](#).
- Bixiyahaaga, ama bixiye ka socda Caafimaadka Dadweynaha, ayaa go'aamin doona haddii aad heli karto dhoos tallaalka MMR ah ama laguugu duro unugyada ka-hortagga jadeecada si ay kaaga caawiyaan inaysan kugu dhicin jadeec kadib markaad ag joogto qof buka oo jadeeco qaba.